

BARASHADA AFKA HOOYO



3



akhriska af SOOMAAALIGA

Muxamed Xuseen Hadi

56-A-276/3

978

BARASHADA AFKA HOOYO

IFTIINKA AQQONTA Series
© Copyright 1995
By Somali Canadian Cult. Association (SCCA)
ALL RIGHTS RESERVED
ISBN 0-9699945-0-8
First Print 1995 Ottawa, Canada

Akhriska af Soomaaliga
BUUGGA 3AAD
FASALADA 3/4AAD



Waxaa Qorey
Maxamed Xuseen Hadi

November 1992
Ottawa, Canada



TUSMADA BUUGGA

1. MAHADNAQ	
2. GOGOLDHIG	
3. The Somali script & Pronunciation.....	1
4. Kan, Tan & Kuwan.....	2
5. Su'aalo.....	3
6. Kuma, Tuma & Kee.....	5
7. Magac u yaal.....	6
8. Cunnada.....	7
9. Khudaar.....	9
10. Tirada.....	11
11. Dadka & Shaqooyinka.....	13
12. Sheekaysi.....	14
13. Erayo Siyaasadeed.....	15
14. Sheegista Waqtiga.....	16
15. Xiran iyo furan.....	17
16. Midabyada.....	18
17. Shaqayn.....	19
18. Sheekaysi Taleefan.....	20
19. Wax Gadasho.....	21
20. Maalmaha Todobaadka & Bilaha Sannadka.....	22
21. Sheekaysi Gaaban.....	23
22. Hawada.....	24
23. Salaanta.....	25
24. Da'da.....	27
25. Makhaayada.....	28
26. Libreeriyadda.....	30
27. Hadalladan Baro.....	32
28. Su'aalo & Jawaabo Gaagaaban.....	36
29. Isbitaalka.....	37
30. Xafiiska Boostada.....	38
31. Afka & Suuganta Soomaaliyeed.....	39
32. Maahmaahyo.....	40

ACKNOWLEDGMENT

The rapid expansion of teaching the Somali language at all levels in Canada promoted the pedagogical methods and complies with the ideals of MULTICULTURALISM, which is crucial at the primary level.

Therefore, the support of the Government of Ontario through the Ministry of Citizenship is acknowledged, however, the opinions expressed in this Book are those of the individual writers.

The SCCA Curriculum Committee

IFTIINKA AQQONTA Series
© Copyright 1995
By Somali Canadian Cult. Association (SCCA)
ALL RIGHTS RESERVED
ISBN 0-9699945-0-8
First Print 1995 Ottawa, Canada

BISMI LAAHI RAXMAANI RAXIM

GOGOLDHIG

Ilaahay (swt) waxan ka baryayaa in uu aqoonta inoo kordhiyo, Amin. Anigoo ka tarjumaya baahida weyn ee loo qabo Barashada Afka Hooyo (Af Soomali). Shibanyaasha, Shaqallada gaaban iyo kuwa dhaa dheerba. Waa ilaahay mahadii inan qorey buuggan oo la magac baxay BTJX, barashada Af Somaaliga, ee dugsiiga sare.

Waxaa igu qasbey diyaarinta buuggan, ka dib markaan ogaadey baahida weyn ee faca soo koraya ee Soomaalida qurbaha ku sugan, gaar ahaan wadankaan KANADA ay u qabaan barashada Afka Hooyo, himiladuna waxay tahay in la isku dubarido manhajkii laga dhigi lahaa Dugsiyada Hiddaha iyo Dhaqanka (Somali Heritage Language Schools), sida ugu fudud ee Barashada Afka hooyo, qaab ay ubadku jeeceystaan oo xiiso geliya, awgeed ayaan deg-deg ku sameyey buuggan oo ku saleysan barashada ereyada af soomaaliga oo ku tarjuman afka Ingriiska, si arday kastaaba labada af kolba ka u yaqaan maahe ka kale uu u barto. Wuxuuna u habeysan yahay halkudhagyo is dhinac yaal oo ku qoran afafka Ingriiska & Soomaaliga, si labada afba ay barashadoodu ugu fududaato.

Waxan mar labaad Ilaahay (swt) ka baryayaa in uu kor inoogu qaado nooleynta afkeena hooyo, uuna fududeeyo ubadkeena barashadiisa iyo ku dhaqankiisa, inagana dhigo kuwii ku faana ee aan ka faanin, Amiin.

Waxaan si gaar ahaaneed mahad weyn u celiñayaa Muraad Cabdalla Mubaarik oo la'aantiis buuggan aannu hirgaleyn, Caafiya Maxamed, Yassin Geelle iyo Ubax Jibril oo dhammaantood garaacista qayb libaax ka qaatey.

Maxamed Xuseen Hadi.

THE SOMALI SCRIPT AND PRONOUNCIATION

I. LETTER VOWELS:

There are five short vowels and other five long ones in Somali. They are pronounced as in the following English words:

SHORT VOWELS

- "A" Pronounced as "a" in the English word "at".*
- "E" Pronounced as "e" in the English word "bet".*
- "I" Pronounced as "i" in the English word "lip".*
- "O" Pronounced as "o" in the English word "lot".*
- "U" Pronounced as "u" in the English word "put".*

LONG VOWELS:

- "AA" Pronounced as "a" in the English word "lab".*
- "EE" Pronounced as "ai" in the English word "chair".*
- "II" Pronounced as "ee" in the English word "feet".*
- "OO" Pronounced as "a" in the English word "call".*
- "UU" Pronounced as "oo" in the English word "roof".*

II. CONSONANTSS:

Consonants in somali are for the most part the same as in English except for the following:

- "J" Pronounced as in the "Jet"*
- "G" Pronounced as in "Pagan".*
- "X" Pronounced as in the Arabic letter*
- "Q" Pronounced as in the Arabic letter*
- "C" Pronounced as in the Arabic letter*
- "Kh" Pronounced as in the "Khakhi" or "Khan".*
- "Dh" has an equivalent neither in English nor in Arabic and it is imperative to hear it from a fluent Somali speaker, or rather from a native speaker.*

N.B.

- 1. Adjectives usually follow the noun, e.g. Nin weyn (great man), buug yar (little book), kursi madow (black chair) etc.*
- 2. There is no indefinite article in Somali as in English.*

THIS (male)

This is a pen
This is a book
This is a chair
This is a table
This is a house

KAN

Kani waa qalin
kani waa buug
Kani waa kursi
Kani waa miiss
Kani waa guri

THIS (Female)

This is a girl
This is a watch
This is a cupboard
This is a paper
This is a window

TAN

Tani waa gabar
Tani waa Saacad
Tani waa armaajo
Tani waa xaashi
Tani waa dariishad

THESE

These are pens
These are chairs
These are tables
These are houses
These are books

KUWAN

Kuwani waa qalmaan
Kuwani waa kuraasi
Kuwani waa miisas
Kuwani waa guryo
Kuwani waa buugaag

V.B. Instead of "this" one can use "that",
and "these" could be replaced by
"those" with no change of the sentence
build up

F.G: "Kan" waxa lagu beddeli karaa "Ka"
"tan" waxaa lagu beddeli karaa "ta"
"Kuwani" waxaa lagu beddeli karaa
"Kuwaas" ayadoon jumlada wa
iska beddelin.

SOME QUESTIONS

Is this a pen?
Yes, it is a pen.

Is this a watch?
Yes, it is a watch.

Is this is a letter?
Yes, it is a letter.

Is this aa chair?
Yes, it is a chair.

Are these chairs?
No. They are not chairs.
They are tables.

Are these books?
No. These are not books.
They are papers.

Are these watches?
No. These are not watches.
These are pens.

SU'AALO

Kani ma qalin baa?
Haa, waa qalin.

Tani ma saacad baa?
Haa, tani waa saacad.

Tani ma warqad baa?
Haa, waa warqad.

Kani ma kursi baa?
Haa, waa kursi.

Kuwani ma kuraasi baa?
Maya. Kuraasi ma aha.
Waa miisas.

Kuwani ma buugaag baa?
Maya. Kuwani buugaag ma aha.
Kuwani waa xaanshiyo.

Kuwani ma saacadaa?
Maya. Kuwanni saacado ma aha.
Kuwani waa walimo.

This chair isn't new.

That cloth isn't white.

That shirt isn't red.

WHAT IS THIS?

What is this?
This is a shirt.
It is a shirt.

Is't white?
Yes, it is.
No, it isn't.

Is't new?
No, it is old.

Is't clean?
No, it is dirty.

What is this?
This is a shop.

Is the shop open?
No, it is closed.

In Somali, no matter whether the noun or the negative words is put first.

Ma cusba kursigani.

Ma cadda maradani.

Ma guduudna shaatigaasi.

KANI WAA MAXAY?

Kani waa maxay?
Kani waa shaati.
Waa shaati.

Ma cad yahay?
Haa, waa cad yahay.
Maya, ma cadda.

Ma cusub yahay?
Maya, waa duug.

Ma nadiif baa?
Maya, waa wasakh.

Kani waa maxay?
Kani waa dukaan.

Dukaanku ma furan yahay?
Maya, waa xiran yahay.

1. Af Soomaaliga waxba kuma jabna haddii magaca laga hor mariyo erayg diidmada ah.

WHO (male)

Who is this man?
This is Axmed.

Where is he going to?
He is going to the Mosque.

Who is with him?
He is alone.
Ali is with him.

WHO (female)

Who is that woman?
She is Asha.

What is she doing?
She is smoking.

Is she a teacher?
No. She isn't. She is a clerk.

WHICH

To which school do you go?
To which Bar shall we go?

Which of the two would you prefer?
That is the book which I like best.

KUMA

Waa kuma ninkani?
Kani waa Axmed.

Halkee buu ku socdaa?
Wuxuu ku socdaa masaajidka.

Yaa la socda?
Waa kaligii.
Cali baa la socda.

TUMA

Waa tuma naagtaasi?
Waa Caasha.

Maxay samaynaysaa?
Sigaar bay cabaysaa.

Ma macallimaad baa?
Maya. mā aha. Waa karraaniyad.

KEE

Dugsigee baad dhigataa?
Baarkee baynu aadnaa?

Labada kee jeclaan lahayn?
Kaasi waa buugga aan ugu jeclahay.
Saacadahaan tee gataa?

PRONOUNS

I am sick.

You are short.

He is a man.

She is fat.

We are Somalis.

We are Moslems.

They are students.

You are whites.

He and she are friends.

They speak Somali.

We are laughing.

Are you chinese?
No, we're Americans.

It is a cat.
It comes here everyday.

It is a beautiful one.
Does he speak French?
Yes, he does.

MAGAC U YAALLO

Waan bukaa (aniga)

Waad gaaban tahay (adiga)

Waa nin (isagu)

Wey buuran tahay (iyadu)

Soomaali baannu nahay (anagu)

Muslim baannu nahay.

Iyagu waa arday.

Waad caddihiin (idinku).

Isaga iyo iyadu waa saaxiib.

Iyagu af Soomaaliga way ku hadlaan.

Waann/waynu qoslaynaa(annagu/innagu)

Idinku ma waxaad tihiin Shiine?
Maya, waxaanu nahay Maraykan.

Waa mukulaal (iyadu)
Maalinkastahalkaanbaytimaaddaa(iyadu)

Waa mid qurxoon (iyadu).
Af Faransiiska ma yaqaan (isagu)?
Haa, waa yaqaan.

ABOUT FOOD and MEALS

Breakfast

In the morning

We have breakfast in the morning

Tea

Water

Afternoon

They drink tea and water in the afternoon

Eggs

We have eggs with the tea.

CUNNADA

Quraac

Aroortii

Aroortii baannu quraacannaa.

Shaah

Biyo

Galab

Galabtii shaah iyo biyo bay cabbaan.

Ukun. Beed ama naalo

Shaaha ukun baannu ku cunnaa.

Milk

Caano

Lunch

Qado

Meat

Hilib

Rice

Bariis

Supper

Casho

Bread

Rooti (muufo)

We have bread and meat for lunch,
rice and milk for supper.

Rooti iyo hilib baannu ku qadaynaa,
Bariis iyo caanana waaannu kucashayna:

Indians like rice.

Bariiska hindidaa jecel.

I don't drink milk for lunch.

Ma jecelī iñaan caanaha qado
ahaan u cabo.

Usually, we have only bread
and tea for supper.

Inta badan, rooti iyo shaah keliya
baannu ku cashaynaa.

Coffee

Qaxwe (bun)

Children are not given coffee.

Carruurta qaxwe lama siiyo.

VEGETABLES

Vegetables are good food

Banana

Sweet banana

Mango

A mango tree

Soup

People like to drink soup

Bitter

Orange

Plate

The bitter orange is in the plate.

Spoon

KHUDAAR (KHUDRAD)

Khudaartu waa cunto fiican.

Moos (muus)

Moos macaan

Cambe

Geed cambe ah

Maraq (fuud)

Dadku waxay jecel yihiin inay maraq cabbaan.

Kharaar

Liin

Saxan

Liinta kharaari waxay ku jirtaa saxanka.

Qaaddo (malqacad) (malgacad)

Full	Buuxa
Empty	Maran
Cup	Koob
Sharp	Afaysan
Knife	Mindi. Middi
A plate full of rice	Saxan bariis ka buuxo.
She has an empty cup	Waxay haysaa koob maran.
A sharp knife is on the plate	Mindi afaysan baa saxanka saaran.
I never eat with spoon	Weligay qaaddo wax kuma cunin.
Here is a clean spoon	Halkaan wāxa taal qaaddo nadiif ah.
Fork	Fargeeto
Kitchen	Jiko (madbakh)
Basket	Dambiil (kolay)

NUMBERS

One

Two

Three

Four

Five

Six

Seven

Eight

Nine

Ten

Eleven

Twelve

Thirteen

Fourteen

TIRADA

1 Kow

2 Laba

3 Saddex

4 Afar

5 Shan

6 Lix

7 Toddoba

8 Sideed

9 Sagaal

10 Toban

11 Kow iyo Toban

12 Labo iyo toban

13 Saddex iyo toban

14 Afar iyo toban

Fifteen

Sixteen

Seventeen

Eighteen

Nineteen

Twenty

Twenty one

Twenty two

Thirty

Thirty one

Forty

Fifty

Sixty

Seventy

Eighty

Ninety

Hundred

Thousand

Million

15 Shan iyo toban

16 Lix iyo toban

17 Toddoba iyo toban

18 Siddeed iyo toban

19 Sagaal iyo toban

20 Labaatan

21 Kow iyo labaaatan

22 Laba iyo labaaatan

30 Soddon

31 Kow iyo soddon

40 Afartan

50 Konton

60 Lixdaan

70 Töddöbaatan

80 Siddeetan

90 Sagaashan

100 Boqol

1000 kun

1000000 Milyan

PEOPLE & OCCUPATIONS

Where is Jama?
He went to the office
He is an engineer

Those two men are teachers.

These girls are students.

Is Jama a farmer?
No, he is not.
He is an artist.

Ali is a Lawyer.
He works at the courts.

Yusuf is a soldier.
His brother is a pilot.
Their sister is a writer.
Their father is an actor.
Who is an actor?
My friend is.
Do you know him?

DADKA & SHAQOONYINKA

Jaamac aaway?
Wuxuu aaday xafiiska.
Isagu waa muhandis.

Labadaas nin waa macallimiin.

Gabadhani waa ardayad.

Jaamac ma beeraley baa?
Maya, maa aha.
Waa fannaan.

Cali waa qareen.
Wuxuu ka shaqeeyaa Maxkamadaha.

Yuusuf waa askari.
Walaalkii waa duuliye.
Walaashood waa qoraa.
Aabbahood waa jile.
Kumaa jile ah?
Saaxiibkay baa ah.
Ma taqaan?

SHEEKAYSI

WHO?

That littl boy's father.
Yes, he is a merchant.
He is not a doctor as you thought.
I did not think that.
Who is that?
She is Ali's sister.
What is she?
She is a Director.
She is a Shopkeeper.

Ali : When do you you get up?
Abdi: Usually at six o'clock a.m.
Ali : When do you take a bath?
Abdi: At half past six.
Ali : Who wakes you up?
Abdi: My mother does.
Ali : When do you usually eat breakfast?
Abdi: At six forty five.
Ali : What do you do after breakfast?
Abdi: I go to school.
Ali : Do you go to the movies?
Abdi: Sometimes I do.
Ali : Do you read newspapers?
Abdi: Not many.
Ali : When shall we meet next?
Abdi: Tomorrow morning"INSHA ALLAH

KUMA

Wiilkaas yar aabihii.
Haa, waa ganacsade.
Takhtar ma aha sidaas mooday.
Sidaas ma moodin.
Taasi waa tuma?
Waa Cali walaashiis.
Maxay tahay?
Waa agaasimad.
Waa dukaanley.

Goormaad toostaa?
Inta badan lixda subaxnimo.
Goormaad maydhataa?
Lixda iyo badhka/barka.
Yaa ku toosiya?
Hooyaday
Goormaad badanaa qureecataa?
Lixda iyo shaniyo afartan.
Maxaad qabataa quraacda ka dib?
Dugsiga ayaan tagaa.
Filimada ma aadaa?
Marmar baan tagaa.
Wargeysyada ma akhridaa?
Ma badna.
Goormaynu kulmi doonaa?
Berri subax Inshaa Allaah.

POLITICAL TERMS

The security council.
Secretary General.
Delegation.
Envoy.
Ambassador.
African Unity.
Colonialism.
Liberation movement.
The middle east.
The far east.
Western Europe.
Revolution.
Summit Conference.
Capitalism.
Socialism.
Communism.
Political borders.
Agreement.
Treaty.
Constitution.
Leadership.
Apartheid.
Office.
Interior Office.
Administration.
Directorship.

ERAYO SIYAASADEED

Golaha Ammaanka.
Xoghayaha Guud.
Wafdi.
Ergey.
Danjire; Safiir.
Midowga Africa.
Gumaysi.
Dhaqdhaqaaq Gobannimodoon.
Bariga dhexe.
Bariga fog.
Orobbadda galbeed.
Kacaan; Tawrad.
Shir madaxeed.
Hantigoosad.
Hantiwadaag.
Shuuci.
Soohdimo siyaasadeed.
Hesiish.
Wacad.
Distuur.
Hogaamin.
Midabtakoor.
Xafiis.
Xafiiska Arrimaha Gudaha.
Maamul.
Kaligii-tashade

TELLING THE TIME

What time is it?
It is five O'clock.
It is ten minutes to ten.
It is ten past five.
It is five past five.
It is eleven thirty.
It is twenty minutes to ten.
It is six O'clock.
It is late.
It is early.
When do you go to bed?
I go to bed early.
Did you come yesterday night?
No. I came last night.
There is a good movie tonight?
I shall go in late.
Tomorrow is a holiday.
Do you plan to go to the beach tomorrow?
Yes. I hope I will go early.

What time do you think?
At seven sharp in the morning.
Who is coming with you?
Nobody.
Why don't you pass me by?
Would you be ready at quarter to seven?
I don't think, because I had an earlier appointment with the doctor.
Well, I am sorry I can't expect you.
O.K. I'll see you at midday at home.

SHEEGISTA WAQTIGA

Waa immisadii?
Waa shantii.
Waa tobankii oo toban dhiman.
Waa tobankii iyo shan daqiiqo.
Waa shantii iyo shan.
Waa kow iyo tobankii iyo badh.
Waa tobankii oo labaatan dhiman.
Waa lix saac (lixdii).
Waa goor dambe.
Waa goor hore.
Goormaad seexataa?
Goor horaan seexdaa.
Habeen hore ma timid?
Maya, xalay baan imid.
Caawa filin fiican baa jira.
Goor dambaan geli doonaa.
Berri waa fasax (feesto).
Berri badda ma aadaysaa?
Haa, waxaan rajeynayaa inaan goor hore tago.
Goormay kula tahay?
Subaxdii toddobada oo gaw ah.
Yaa ku soo raacaya?
Cidna.
Maad i s̄oo martid?
Toddobadaoo rubac la' diyaar ma noqonayssa
Fili maayo. maxaa yeelay ballan horaa:
takhtar la lahaa.
Waan ka xumahay haddaa, kuma sugika
Waa hagaag. Gurigeynu isku arkiduhur!
Nabad gelyo.

CLOSED and OPEN

The door is open.
The door is closed.

Is the door closed?
No. It is not. It is open.

The window is closed.
The window is not open.

Is the window open?
No, it isn't open, it is close.

She is wearing a blue coat.
What colour is your coat?
It is black.
Which colour do you like best?
I like the green ones.

Don't you like the white dress?
I don't, because it easily gets dirty.
I agree with you, but it is beautiful.

XIRAN IYO FURAN

Albaabku ma xiran yahay?
Maya, ma xirna. Waa furan yahay.

Dariishadu ma furan tahay?
Dariishaddu ma furna.

Dariishaddu ma furan tahay?
Maya, ma furna. Way xiran tahay.

Are the doors and the windows closed?
No. The doors are open but the windows are closed.

Waxay xirantahay jubbad buluug ah.
Jubbaddaadu waa midabkee?
Waa madow.
Midabkee ugu jeceshahay?
Waxaan jecelahay kuwa cagaaran.

Lebbiskā dharka cad miyaadan
jeclayn?
Ma jecli, waayo markiiba dakhso
ayuu u wasakhoobi og yahay.
Waan kugu raacsanahay laakiin
waa qurux miidhan.

COLOURS

Black

The blackboard is black.

White

She wore a white dress

Red

Is your shirt red in colour?

Green

Vegetables are always green.

Blue

The Somali Flag is blue.

Yellow

The yellow books are expensive.

The sky

The sky is clear with no clouds.

A coat

MIDABYADA

Madow

Sabuuraddu waay madowdahay.

Cad

Dhar cad bay xirnayd.

Guduud (Casaan)

Shaatigaaga midabkiisu ma guduud baa

Cagaar (Akhdar) (Doog)

Khudraddu weligeed waa cagaar.

Buluug

Calanka Soomaalidu waa buluug.

Huruud

Buugaggā huruudda ahi waa qaali.

Cirka

Cirku waa saafi aan daruur lahyn.

Jubbad

WORKING

I am working.
We are working.
We are working in the house.

Do you work on Fridays?
No. I don't. My father does.

He works on his farm.
Mother works at home.

My sister helps my mother.
She works hard.
My brother works in an Hotel.
We are farmers.
They are workers.

The working hours has to be observed.
Working conditions are not bad.

They don't work on sundays.
Today is a holiday.

Do you work on holidays?
No, we don't.

We stay at home.

SHAQAYN

Waan shaqaynayaa.
Waannu shaqaynaynaa.
Gurigaannu ka shaqaynaynaa.

Jimcayaasha ma shaqaysaa?
Maya, ma shaqeeyo. Aabahay baashaqeeya

Beertiisuu ka shaqeeyaa.
Hooyo waxay ka shaqaysaa guriga.

Walaashay baa hooyaday kaalmaysa.
Aad bay u shaqaysaa.
Walaalkay wuxuu ka shaqeeyaa Hoteel.
Annagu waxaannu nahay beeralay.
Iyagu waa shaqaale.

Saacadaha shaqada waa in la dhowraa.
Xaaladaha shaqadu ma xuma.

Axadaha ma shaqeeyaan.
Maanta waa fasax.

Fasaxyada ma shaqaysaan?
Maya, ma shaqayno

Gurigaannu iska joognaa.

TELEPHONE CONVERSATION

Abdi: Hello, is Jama there?
Jama: This is Jama. Good morning.
Abdi: How are you Jama?
This is Abdi.
Jama: Fine, thanks. How are you? What is new?
Abdi: I am going on a trip today.
Jama: Really! Where to?
Abdi: To somewhere in Europe.
Jama: For what reason?
Abdi: For scholarship.
Jama: That is fine. When're you leaving?

Abdi: Tomorrow morning.
Jama: So soon? How are you going?
Abdi: Naturally by plane.
Jama: When are you coming back?
Abdi: After four years.
Jama: Too long! Can we meet tonight?

Abdi: I am afraid not. I am busy buying things.

Jama: Well, I hope you good time.

Abdi: thank you Jama. I hope you will write to me.
Jama: After I get your address.
Abdi: That is natural. I'll write to you as soon as I get there.

Jama: I hope so, Good bye.
Abdi: Good bye, Jama.

SHEEKAYSI TALEEFAN

Cabdi: Halow, Jaamac ma joogaa?
Jamac: Waa Jaamac. Subax wanaagsan.
Cabdi: War Jaamac bal iska warran?
Waa Cabdiye.
Jaamac: Waan roonahay, mahadsanid, Adigu iska warran. Maxaa cusub?
Cabdi: Safar baan maanta u baxayaa.
Jaamac: Ma kaa dhab baa! Xaggee? Cabdi: Meel Yurub ka mid ah.
Jaamac: Sababtee u baxaysaa?
Cabdi: Waxbaraso dibadeed.
Jaamac: Way wanaagsan tahay. Goormaad tageysaa?
Cabdi: Berri subax.
Jaamac: Ma dhaqsahaas? Maxaadraacaysaa
Cabdi: Dabcan dayuurad.
Jaamac: Goormaad soo laabanaysaa?
Cabdi: Afar sano ka dib.
Jaamac: Aad bay u dheertahay! caawa ma is arki karnaa?
Cabdi: Waxaan ka baqayaa inaysan suuroobeyn. Wax gadasho ayaan mashquul ku ahay.
Jaamac: Waa hagaag. Waqti fiican baanku rajeynayaa.
Cabdi: Mahadsanid Jaamac. Waxaan rajeynaya inaad warqado ii soo qori doonto.
Jaamac: Kadib kolkaan helocinwaankaaga.
Cabdi: Taasi waa iska dabiici.
Markaan xaggaa gaaro ayaan xaashi kuu soo dirayaa.
Jaamac: Waan kaa filayaa. Nabadgalyo.
Cabdi: Nabadgalyo Jaamac.

SHOPPING

Do you have sugar, Ali?
We need some sugar.

How much is a pound of sugar?
It is cheap.

It is two shillings a pound.

Do you need milk, too?
No, thank you.

Where could I get them?
In the market.

Don't you need bananas?
No. I don't need them.

I have some at home.

What about meat?

I need it, but I ran short of money.

Meat is expensive these days.

How much is a pound of meat?
It is three shillings a pound.

WAX GADASHO

Sonkor ma haysaa, Cali?
Qadar sonkor ah baannu u baahannahay

Rodolka sonkorta ahi waa meeqa (immisa)
Waa jaban yahay (waa raqiis).

Rodolkii waa laba shillin.

Caanana ma u baahan tahay?
Maya, mahadsanid.

Xaggee baan ka heli karaa?
Suuqa.

Mooss miyaadan u baahnayn?
Maya, uma baahni.

In baa guriga ii taal.

Hilib ka waran?

Waan u baahanahay laakiin lacagtii baa ig
dhamaatay.

Maalmahan hilibku waa qaali.

Rodolka hilibka ahi waa immisa?
Rodolkii waa saddex shilin.

DAYS OF THE WEEK

Saturday
Sunday
Monday
Tuesday
Wednesday
Thursday
Friday

MONTHS OF THE YEAR

January
February
March
April
May
June
July
August
September
October
November
December

How many days are there in a week?

There are seven days in a week.

How many weeks are there in a month?

There are four weeks in a month.

How many months are there in a year?

There are twelve months in a year.

MAALMAHA TODOBAADKA

Sabti
Axad
Isniin
Talaada
Arbaco
Khamiis
Jimce

BILAHA SANNADKA

Jannaayo
Febraayo
Maarso
Abriile
Maajo
Juunyo
Luulyo
Agoosto
Sitembar
Oktoobar
Noofembar
Disembar

Toddobaadkii waa immisa maalmood?

Toddobaadkii waa toddoba maalmood.

Bishii waa immisa toddobaad?

Bishu waa afar toddobaad.

Sannadkii waa immisa bilood?

Sannadkii waa labo iyo toban bilood.

SHEEKAYSI GAABAN

Magacaa?
Gurigaan yaa leh?

Hooyadey baa leh.
Ahmed waa kee?

Waa wiilkaas yar.
Yaa halkaas jooga?

Xagge buu ku nool yahay?
Wuxuu ku nool yahay Otaawa (Kanada).

Waa immisa jir?
Waa sideed iyo toban jir.

Ma takhtar baa?
Maya, ma aha.

Waa arday (Dugsiiley).

Muxuu hadda samaynayaa?

Shaadh buu tolayaa.

Marmar buu shaqadaas qabtaa.

Ma heestaa.
Maya, ma heeso.

Walaashay baa heesta.

Xagge baad ku socotaa?

Waxaan ku socdaa Filimka.

Maxaa socda.

A SHORT DIALOGUE

What is your name?
Whose house is this?

It is my mother's.
Who is Ahmed?

He is that little boy.
Who is there?

Where does he live?
He lives in Ottawa (Canada).

How old is he?
He is eighteen years old.

Is he a doctor?
No, he is not.

He is a school boy.

What is he doing now?

He is tailing a shirt.

He sometimes does this work.

Do you sing?
No, I don't.

My sister does.

Where are you going to?

I am going to the movie.

What is on?

HAWADA

Roob

Roob badan.

Aad buu u da'ayaa.

Banaanka uma bixi karo maxaa waayo
roob baa da'aya.
Hawadu maanta side bay tahay?

Waa hawo xun.

Waa hawo fiican.

Waa hawo siigo miiran ah.

Waa hawo kulul.

Roobkii ma kacay? (ma qaaday).

Maya, weli waa da'ayaa.

Xagaa; Xagaayo

Waan necbahay xagaayada.

Had iyo jeer xagaagii waa kulayl.

ABOUT THE WEATHER

Rain

A heavy rain.

It is raining heavily.

I can't go outside for it is raining.

How is the weather today?

It is a bad weather.

It is a good weather.

It is a dusty weather.

It is a hot weather.

Has it stopped raining?

No, it is still raining.

Summer; summer rains.

I hate Summer rains.

It is always hot in Summer.

GREETINGS & COMPLIMENTS

Good morning.

Good evening.

Good afternoon.

Good night.

Goodbye.

How do you do?

How is your father?

He is fine, and yours?

He is fine. too.

Are you well?

How do you feel?

Very well, thank you.

How is your family?

They are all fine.

How is your wife?

SALAANTA

Subax wanaagsan.

Fiid wanaagsan.

Galab wanaagsan.

Habeen wanaagsan.

Nabadgelyo.

Sidee tahay? (Iska warran?).

Aabbahaa sidee yahay?

Waa ladan yahay, Aabbahaana?

Isna waa ladan yahay.

Ma roon tahay? (ma ladan tahay?).

Sidee tahay?

Aad baan u ladanahay, mahadsanid.

Reerkaaga (xaaska iyo iyo ciyaalka) sidee tahay? (ka warran).

Giddigood way ladan yihiin.

Afadaadii sidee tahay?

She is not well.

How is your husband?

I haven't seen him for long.

He is away.

Remember me to your father.

Convey my greetings to them.

I longed to see you.

Are you all well at home?

Do sit down.

Take a seat.

I can't, I'm in a great hurry.

You don't want to have anything with me?

I'm sorry, I have told you.

Ma ladna. (way xanuunsanaysaa).

Saygaagii (ninkaagii) sidee yahay?

Beryahaan ma arag.

Waa maqan yahay.

Aabbahaa igu salaam.

(Iyaga) igu salaam.

Waan u jeelay aragtidaada.

Gurigii ma lagu wada nabad qabay?

Fariiso, soo dhowow.

Fariiso. (Kursi soo qaado).

Ma karo, aad baan u degdegsanahay.

Waxba ila cabbi meysid miyaa?

Waan ka xumahay, waan kuu sheegay.

ABOUT THE AGE

How old are you?
I am forty.

How old is he?
He will be 20 next year.

How old is she?
She is nineteen years of age.

Are you 30 years old?
No. I am older than that.

Ali is nearly ten.
He will be eleven next month.

He was nine years last month.
He looks older.

She is still quite young.
She is older than me.

He is the elder of the children.
This is my elder son.

He is more than fifty.

DA'DA

Immisa jir baad tahay?
Afartan jir baan ahay.

Isagu waa meeqa (immisa) jir?
Sannadka dambe ayuu 20 jirsanayaa.

Iyadu waa Immisa jir?
Waa sagaal iyo toban jir.

Soddon jir ma tahay?
Maya, intaas ka weyni.

Cali waa toban ku dhowaad.
Bisha dambe ayuu kow iyo tobanjirsanayaa

Bishsii hore sagaal jir buu ahaa.
Waa igala weyn yahay.

Weli aad bay u yar tahay.
Iyadu iga weyn.

Isagaa carruurta u weyn.
Kani waa curadkeygii.

Konton jir ka weyn.

She doesn't look her age.
My mother has turned sixty.

You don't look so old.
I was thirty last month.

He is either nine or ten.
Yusuf is older than Ali.

He is four years older than him.
I'm two years older than my wife.

He is an old man now.
He is too young to be a pilot.

IN A BAR

Let us go to the Bar.
Let us go. I am thirsty and want
something to drink

Will you take Coca-cola?
No. I will take black coffee.

Do you take sugar in your coffee?
What will you take?

I will take some tea.
How much is a cup of tea?
Thirty cents only.

Da'deedu kama muuqato.
Hooyaday lixdankii bay dhaaftay.

Da'daadu kaama muuqato.
Bishii horaan soddon jirsaday.

Waa sagaal jir ama waa toban jir.
Yuusuf baa Cali ka weyn.

Afar sano buu ka weyn yahay.
Labo sano baan afadayda ka weynahay.

Hadda waa nin weyn.
Aad buu uga yar yahay inuu duuliyenoqdo

MAKHAAYADA (Baar)

Inakeen baarka aadne.
Ina mari, waaban oommanahay oo
waxaan cabbaan rabaaye.

Koka kola ma cabbaysaa?
Maya, bun madow baan cabayaa.

Bunka sonkor ma ku darsanaysaa?
Maxaad cabaysaa?

Shaah baan cabbayaa.
Koobka shaah ahi immisuu joogaa?
Soddon senti keliya.

Give me one cup of coffee.

Do you take milk in your tea?
No. I don't. I want it black.

I would like something cold.
Do you take iced tea?

Sometimes.

They take it in America.
How much do I pay?
Let me pay it.

You will pay some other time.
I must pay for myself.

Cold water is not charged.
He would like a glass of cold water.

I don't usually drink hot tea.
I am exactly like you.

Will you have lunch with me tonight?
That pleases me.

Koob bun ah i sii.

Caano ma ku darsataa shaaha?
Maya. waxaan rabaa rinji (bigays).

Wax qabow baan jeclaan lahaa.
Shaah baraf leh ma cabtaa.

Marmar.

Maraykan bay ku cabbaan.
Immisaan bixiyaa?
Anigu aan bixiyee daa.

Mar kale baad bixin doontaa.
Waa inaan iska bixiyaa.

Biyaha qaboobi lacag ma leh.
Wuxuu jeclaan lahaa galaas biyo qabowah

Badanaa shaaha kulul ma cabbo.
Aniguna kula mid baan ahay.

Caawa ma ila cashaynaysaa?
Waan jeclahay.

IN A LIBRARY

Do you have any Somali books?
Do you sell magazines?

Yes, I do.
What books have you?

We have novels.
We have text books.

We sell English books.
Show me that red book.

Do you like science books?
No. I am interested in historical works.

Show me some of those post-cards.
Do you have an English Dictionary?

Yes, we have many.
Do you have any books on the history
of Somalia?

Yes, we have several books.
What is the name of the author?

LIBREERiyADA

Buug Soomaali ah ma haysaa?
Joornaallo ma gaddaa?

Haa, waan gadaa.
Maxay yihiin buugtaad haysaa?

Waxaan haynaa buugta sheekooyinka .
Waxaan haynaa buugta dugsiyada.

Waxaan haynaa buugag Ingiriis ah.
Buuggaas guduudan i tus.

Buugta ssayniska ma jeceshahay?
Maya, waxaan doonayaa buugta taariikhdaal

Kaararkaas boostada qaarkood i tus.
Qaamuus Ingiriis ah ma haysaa?

Haa, wax badan baannu haynaa.
Ma haysaa wax buug ah oo
ku saabsan taariikhda soomaaliya?

Haa, dhqwr baannu haynaa.
Qoraaga magaciis?

How much is it?
It is rather expensive.

Show me those maps over there.
Do you have a map of Africa?

This is not a good quality.
It is the best.

You sell ink, don't you?
Yes, I do.
That kind of ink do you want?

Do you sell envelopes?
Oh, yes, I have all sorts of them.
How do you sell them?

Immisuu joogaa?
Waa yara qaali.

Maababkaas i tus
Maabka Afrika ma haysaa?

Kani nooc wanaagsan maaha.
Waa ka ugu wanaagsan.

Khad waad gadda, sawmaaha?
Haa, waan gadaa.
Khad nooc ee ah ayaad rabtaa?

Boqshado ma iibsisaa?
Haa, nooc kasta waan hayaa.
Sidee baad u gaddaa?



LEARN THESE PHRASES

Listen to me.

What do you want?

I have something to tell you.

What is your father's name?

Does he know you?

Do you understand me?

I don't understand you.

Why do you not answer?

What do you mean?

How long have you been here?

One year only.

Which one do you like best?

I am listening to you.

What do you say?

What is that?

What is the use of it?

Do you speak Somali?

Yes, I speak it fluently.

How did you come here?

When will you leave?

Tomorrow or the day after.

Where did he go?

Where did you come from?

Could you give me your book?

I am sorry to trouble you.

I said nothing.

HADALLADAN BARO

I maqal.

Maxaad rabtaa?

Waxaan rabaa inaan wax kuu sheego.

Aabbahaa magaciis?

Ma ku yaqaan?

Waxaan sheegayo ma garanaysaa? (ma i fahmaysaa?)

Waxaad sheegayso magaran. (kumagaran)

Maxaad u jawaabi weyday?

Maxaad u jeeddaa?

Immisaad halkan joogtey?

Hal sano keliya.

Kee baad ugu jeceshahay?

Waan ku maqlayaa (dhageysanayaa)

Maxaad leedahay?

Kaasi (Waxaasi) waa maxay?

Maxaa laga faa'idayaa?

Af Soomaaliga ma ku hadashaa?

Haa, si fiican baan ugu hadlaa.

Sidee baad halkan ku timid?

Goormaad tageysaa?

Berri ama sahandambe

Xaggee buu tagay (Aaday)?

Xaggee baad ka timid?

Buuggaaga ma i siin kartaa?

Waxaan ka xumahay inaan ku labo.

Waxba ma'aan oran.

MORE PHRASES AND SENTENCES

Put on.

Put on your shirt.

Put on your hat.

Don't put your shirt on.

He put on his clothes in a hurry.

Put that one on.

Put down.

Put down your name.

He is putting down his address.

Put off.

The teacher put off the meeting.

He also put off the lecture.

Put out.

Put out the light.

HADALLO IYO WEERO KALE

Gasho.

Shaatigaagaa gasho.

Koofiyadaada gasho.

Shaatigaaga ha gashan.

Degdeg buu dharki u gashaday.

Kaas gasho.

Dhig ama Qor

Magacaaga qor.

Wuxuu qorayaa cinwaankiisa (meesha lag helo).

Baajin.

Macallinku shirkii wuu baajiyey.

Casharkii (Lagjarkii) wuu baajiyey.

Dami (bakhtii).

Nalka dami.

We put out the fire.
Take off.

Take your tie off.
Why did he take his hat off?

People take their clothes off before they go
to bed.
Don't take your coat off, because it is cold.

I took my new shoes off.
Get him a shirt.

I got your note.
She got away from this town.

Get away with.
He got away with the girl, too.

She got in the bus.
They got off the taxi.

Get over (Well).
I hope you get over it.

Get through.
Get up.
Workers get up early.
Get together.

Dabkii baannu daminnay.
Bixi (iska siib).

Nigtayga (tayga) iska bixi.
Muxuu koofiyadda iskaga bixiyey?

Dadku dharkay iska bixiyaan intaysan seexan
(jiifan).
Jubbadda hayska bixin waa dhaxane.

Kabihii cusbaa baan iska bixiyey.
Shaati u keen.

Farriintaadii waan helay.
Magaaladani way iskaga tagtay.

La carar.
Gabadhiina wuu la cararay.

Baskii bay gashay.
Tagsigii bay ka degeen.

Bagso (Rayso).
Waxaan rajeynayaa inaad ka bogsato.

Idlayn (ka gudub).
Toosid.
Shaqaaluhu goor hore bay kacaan.
Kulma.

Let us get together on Friday.
Give him some money.

Give up.
I gave up smoking.
Give in.
Enemy.

Troops.
The enemy troops gave in.
Give rise to.
Oppression.

Revolutions.
Oppression gives rise to revolutions.
Loot at.
Loot at that lion.
Take a look at this watch.
Look after.

Mothers look after their children.
Look for.
Lost.
I am looking for my lost pen.
Look forward to.
Arrival.
She looks forward to his arrival.
Look up.
Look up that word in the Dictionary.

Jimcaha aan kulano.
In lacag ah sii.

Iska deyn (joojin).
Sigaarkii waan iska daayey.
Isdhiib.
Cadow.

Ciidammo.
Ciidammadii cadowgu way is-dhiibeen.
Keenid (Sababid).
Dulmi (Cadaadin).

Tawrado (Kacaano).
Tawradaha waxaa keena dulmiga.
Fiirin.
Libaaxaas fiiri.
Saacaddan fiiri.
Ilaalin (Xannaanayn).

Hooyooyinka ilmahooda ayay ilaaliyaan.
Raadin.
Lumay.
Waxaan raadinayaa qalinkaygii lumay.
Sugid.
Imaatin.
Waxay sugaysaa imaatinkiisa.
Ka raadin.
Eraygaas qaamuuska ka fiiri.

QUESTIONS AND SHORT ANSWERS

Are they coming?

Yes, they are.

No, they are not.

Am I late?

Yes, you are.

No, you are not.

Was he angry?

Yes, he was.

No, he wasn't.

Did he get my letter?

Yes, he did.

No, he didn't.

Did it rain yesterday?

Yes, it did.

No, it did not.

Do we have time?

Yes, we do.

No, we don't.

Have you been sitting for long?

Yes, I have been.

No, I haven't been.

Does he live here?

Yes, he does.

Didn't you see him?

Yes, I did.

SU'AALOIYOJAWAABO GAAGAABAN

Ma imaanayaan?

Haa, way imaanayaan.

Maya, iman maayaan.

Miyaan daahay?

Haa, waad daahday.

Maya, ma daahin.

Miyuu caraysanaa?

Haa, wuu caraysnaa.

Maya, ma caraysnayn.

Xaashidaydii ma helay?

Haa, wuu helay.

Maya, ma helin.

Shalay roob ma da'ay?

Haa, waa da'ay.

Maya, ma di'in.

Waqti ma haysannaa?

Haa, waan haysanaa.

Maya, ma haysanno.

Ma in badan baad fadhiday?

Haa, in badan baan fadhiyey.

Maya, ma fadhiyin.

Ma halkaan buu ku nool yahay?

Haa, halkaan buu ku nool yahay.

Miyaadan arag?

Haa, waan arkay.

AT THE HOSPITAL

Where is the pain?
I feel very sick.
I feel like vomiting.
Take these pills.

When shall I take them?
Before you go to bed.
How shall I take them?
Take two of them at a time.
Has the doctor arrived yet?

Where did he learn medicine?
Doctor's prescription.
Children don't like injections.
They like sweet syrups.

He has a fever.
Put out your tongue.
I can't sleep well.
Call a doctor.

I feel better today.
My son can't eat anything.
He has been ill for a long time.
My tooth aches.

I have pain all over my body.
I have no strength.
He broke his hand.
I have a cold.
You are getting very thin.
You need a balanced diet.
Do you always take much Aspirin?
I usually perspire when I take that
medicine.

ISBITAALKA

Xaggee lagaa hayaa?
Aad baan u bukaa.
Matag baa i haya.
Kiniiniyadan cun.

Goormaan cunaa.
Intaadan seexan.
Sidee u cunaa?
Markiiba labo xabbo cun.
Takhtarkii weli ma yimid?

Xaggee daawada ku baratay?
Warqad takhtar.
Ilmuhu irbadaha ma jecla.
Waxay jecel yihiin Sharoobada macaan.

Qandhaa haysa.
Carrabka soo bixi.
Si fiican uma seexan karo.
Takhtar u yeer.

Maanta waa roonahay.
Wiilkaygu waxba maa cuni karo.
In badan buu jirranaa.
Ilig baa i xanuunaya.

Jirka oo dhan baa layga hayaa.
Itaal (Xoog) layguma arko.
Gacantiisuu jabiyeey.
Duray baa i haya.
Aad baad u caatoobeysaa.
Cunno miisaaman baad u baahan taha.
Asbaro badan ma cuntaa?
Badanaa waan dhididaa markaan
daawadaas qaato.

AT THE POST OFFICE

Will you show me where the post is?
I have a letter to post.
I want to post these letters.
The postman brought us letters.
I need some postal stamps, please.
It costs forty cents to send an ordinary letter.
Give me a one shilling stamp.
It costs 2 Shillings to send a registered letter.
I am sorry, we don't have them.
Where is the nearest letter box?
Drop your letters in that letter box.
Here is a letter for you.
A mail arrived this morning.
Let me have your address.
I think there is a letter for you at the post office.

We don't have postman in our town.
I expect a letter from my wife.
When does the mail arrive?
From where?
It arrived yesterday.
I have just received this letter.
What else?
And a paper to read.

XAFIISKA BOOSTADA

Ma i tusi karaysaa xafiiska boostada?
Warqad baan rabaa inaan diro.
Waxaan rabaa inaan waraaqahan diro.
Boostaalihii baa waraaqo noo keenay.
Waxaan ubaahan nahay waxoogaa tigidhoa
Warqadda caadiga ah afartan senti baa lagu diraa.
Tigidh hal shilin ah i sii.
Warqadda ballansan waxaa lagu diraa 2 shilin

Waan ka xumahay, ma hayno.
Sanduuq warqadeed kee ugu dhow?
Waraaqahaaga sanduuqaas ku rid.
Halkan warqad baa kuu taal.
Saaka boostaa timid.
Cinwaankaaga i sii.
Waxaan u malaynayaa in boostada warqadi kuu tiil.

Magaaladeennu boostaale ma leh.
Afadaydii baan warqad ka sugayaa.
Boostadu goormay timaadaa?
Xaggee (meelma)?
Shalay bay timid.
Warqaddan haddaan helay.
Maxaa kale?
iyo Wargeys(Joornaal) la akhristo.

I speak Somali.
Where did you learn it?
I learned it in my country.
Why do you learn Somali?
Because I intend to go to Somalia.

Because it is a rich language.
I like Somali literature.
I am trying to understand the rich
Somali literature.
Is Somali written?
Yes, it is written in the Latin script.
Then it is easy to learn it.

Can you tell me the most famous Somali
poet?

Yes, that is Sayid Mohamed.
Was he only a poet?
No, he was a warrior as well.
He was also the Derwish Leader.

He fought against England, Italy and
Abyssinya.

When did that happen?
In the beginning of this century.
There were also Farah Af'ad and others.
They were famous for their classical
poetry.

Can I get Somali books?
You can get them everywhere in Somalia.

Somali is the only official language in
your country.
It is also the language of instruction.
Thank you very much for this.

Af Soomaaliga waan ku hadlaa.
Xaggee baad ku baratay?
Dalkayagaan ku bartay.
Af Soomaaliga maxaad u baranaysaa?
Maxaa yeelay waxaan rabaa inaan
Soomaaliya aado.
Maxaa yeelay waa af hodan ah.
Waan jeclahay suugaanta Soomaalida.
Waxaan isku deyayaa inaan garto suugaanta
Soomalida ee hodanka ah.
Af Soomaaligu maa qoran yahay?
Haa, wuxuu ku qoran yahay xarfaha Laatiinka.
Markaas waa sahal in la bartaa.

Ma ii sheegi kartaa gabayaaaga Soomaaliyeed ee
ugu caansan?

Haa, kaasi waa Sayid Maxamed.
Ma gabayaa keliya buu ahaa?
Maya, dagaalyahanna wuu ahaa.
Wuxuu kaloo ahaa (Hoggaamiye)
Abaanduulihii Daraawiishta.
Wuxuu la dagaalamay Ingriis,
Talyaani iyo Xabashi.
Taasi goormay dhacday?
Qarnigan bilowgiisii.
Waxaa weheliyey Faarah Afcad iyo rag kale
Waxay caan ku ahaayeen
gabayadoodii heerka sare ahaa.

Buugag Af Soomaali ah ma helikarayaa?
Meel kasta oo Soomaaliya ah
waad ka heli kartaa.
Af Soomaaligu waa afka keliya ee dalkaan
rasmiga ka ah Wadankankiina.
Sidoo kale waa afka wax lagu barto.
Taas waad ku mahadsan tahay.

PROVERBS

A liar is a sorcerer

He who said, "I", has distinguished himself from others.

He who does not perspire eats not his fill.

He who used to be mad is not to be talked of insanity.

(An already) drenched person does not restrain himself from water.

Flowing water make the stagnant water move.

Of people's actuality just a ruler and a begger could tell.

He who warned you has not killed you as yet.

Either have patience for women or dispense with them.

A wise man is not openly sent away, but is shown a reason for it.

Don't get up for a person whom you can defeat while sitting down.

A wise man can forecast the reason for his death.

Birds of feathers fly together.

One who praises himself is like a she-goat that suckled itself.

Poverty makes you beg your foe.

The humpbacked knows how to sleep.

An elderly man has better experience.

Everybody gets the benefits of his savings.

Let us negotiate means let us agree.

MAAHMAAHYO

Nin been yaqaan waa nin fal yaqaan.
Nin ani yiri dad iska sooc.

Nimaan dhididini ma dhergo.
Nin waalan jiray waali loogamasheekeeyo

Nin qoyani biyo iskama dhowro.

Biyo socdaa biyo fadhiyey socodsiiyaan

Dad nin u taliyey iyo nin tuugay baa yaqaan.

Nin kuu digay kuma dilin.

Dumar ama u samir ama ka samir.

Nin weyn tag lama yiraahdee wuxuu ku tagaa la tusaa.

Nimaad fadhi kaga adag tahay looma sare joogsado.

Nin weyni wadkiis waa yaqaan.

Shimbirba shimbirkiisuu la duulaa.
Nin is faānshay waa ri' is nuugtay.

Baahi nin kuu daran bay kuu geysaa.
Nin tuur leh si uu u seexo isagaayaqaa.
Nin gu' kaa weyn garashana kaa weyn.
Qof waliba wuxuu dhigtuu dheefsadaa.
Aan wada hadallo waa aan heshiino.

A leopard's baby is not taken
(it is never tamed).

A dead man's shoes, are better than him.

A badly veiled man is thought to be
hiding a thing.

One cannot stroke (of his body) a place
higher than his head.

A sick man is not highly spirited.
Vomiting is a sign of sickness.

Pull my hands and let me pull yours
is just tiring hands.

Two different things cannot be thought
of in a time.

Relying on it's mother's kindness, a young
donkey suckles the former's teats from
behind

Even his mother gives him nothing to
whom who does not ask for.

While in it's old hole a rabbit searches
for a new one.

Of men three are the worst: He who
doesn't patch up his clothes, he who is
irresolute and he who doesn't economize.

A snake is to be killed right on the head.

He who can't foresee the future,
cannot comprehend of the present.

Ilmo shabeel lama qaato.
(rabaayad ma galo).

Nin dhintay kabihisaa dhaama.

Nin hullaab xumi wax inuu
qarsanayaa la moodaa.

Meel madaxa ka saraysa oo la
salaaxo ma jirto.

Nin bukaa ma billa.
Bushu maraggii waa matag.

I jiid aan ku jiid ee waa gacmo daalis.

Laabi laba ma leh (u la').

Dameero isku hallayn bay
hooyadood dabada uga nuugaan.

Nimaan hadlin habartiina wax
ma siiso.

Bakayle intuu bur ku jiruu bur kale
daydaydaa.

Rag saddex baa ugu liita: Ma toshe,
ma tashade iyo ma tashiishe.

Mas madaxaa laga dilaa.

Nimaan waxa soo socda garani
waxaa joogana ma garto.

He who is swept resist a saying cannot stand for a spear.

He who is swept away by a torrent would even lean against the foam.

(People) could not beat a hyena with a stick and slandering it is of no avail.

He who is unaware of his interests gets destroyed before a ragged cloth wears out.

Both truth and teeth are whitened.

A ram sees not the sky unless it is slaughtered.

Nimaan weer sugini waran ma sugo.

Nin daad qaaday xumbo cuskay.

Waraabe ulna lala gaari waa, cayna wax lagaga guri waa (qaadi waa).

Dantiisa mooge, maro duuga horteedbuu dhammaadaa.

Run iyo ilkaba waa la caddeeyaa.

Wan weyne ilaa la gawraco indhihiisu cirka ma arkaan.